VERMONT
DEPARTMENT OF HEALTH

# Sida Loo Jeermis dilo Ceelkaaga La Qoday ama

Luulyo 2024

Raac tillaabooyinkan si aad jeermiska uga disho ceelkaaga haddii bakteeriyadu ku jirto biyahaaga, ceelkaaga la dayactiray (oo ay ku jiraan beddelidda bamka), waxaad rakibtay ceel cusub, ama waxaa nidaamka biyaha ku jira ur hydrogen sulfide (ukunta qudhuntay).

## Kahor intaadan Jeermiska Ka Dilin Ceelkaaga

**Baadh ceelkaaga iyo nidaamkaaga biyaha adiga oo toos u indha indhaynaya oo samee wixii dayactir ah.**

- Raadi oo hagaaji meel kasta oo wasakhowga bakteeriyada ka imanayo oo ku hareeraysan ceelkaaga, sida qulqulka, kala-goysyada aan hoobiyeyaasha ahayn, daboolada dabacsan, ama agabka hawo-mareenka ah ee dillaacay.

**Tixgeli inaad ka eegto nitrate iyo chloride si ay kaaga caawiso inaad ogaato isha.**

- Nidaam nadiifineed ama beer kuu dhow ayaa noqon karta isha wasakhawga.

**Ogow qoto dheeraanta iyo cabbirka ceelkaaga.**

**Soo dhaanso biyo ku filan oo ku haynaya 3 ilaa 5 maalmood.**

- Karkari hal daqiiqo biyo kasta oo loo isticmaalo cabbitaanka, karinta, dhaqida cuntada, cadayashada, ama samaynta baraf ama caanaha ilmaha. Waxaad sidoo kale ka heli kartaa ama ka iibsan kartaa biyo meel kale oo ammaan ah. **Fiiro gaar ah: biyaha karkaraya waxa laga yaabaa inay isu ururiyaan wasakhda kale, sida nitrate-ka, xilliga, ee ceelkaaga.** Kaliya karkari biyahaaga haddii aad ogtahay inaysan wasakh kale ku jirin biyahaaga.

**Ku nadiifi biyo nidaamkaaga haddii biyuhu u muuqdaan kuwo caddaan ah ama ay ka buuxdo huubo.**

- Fur qasabadda dibadda oo biyo raaci qiyaastii hal mug oo ceelka ah. Ka digtoonow inaad ceelka faaruqiso, kaas oo wax yeeli kara oo sababi kara in biyahaagu wasakhoobaan.

## Hage Tallaabo-Tallaabo ah oo lagu Jeermis Dilayo Ceelkaaga

Waxaad si toos ah ceelkaaga ugu dari doontaa bleach chlorine. Biyaha koloriinta leh waxay dhex qulquli doonaan dhammaan tubooyinka iyo qasabadaha gurigaaga.

1. Ka saar ama ka leexo qalab kasta oo biyaha lagu daweeyo, sida jilciyaasha

biyaha ama unugyada osmosis-ka, maadaama ay nadiifintu waxyeello u geysan karto. Waxaad u baahan doontaa inaad si gooni ah jeermiska uga disho aaladahaan iyadoo la raacayo tilmaamaha soo saaraha.

2. Soo ururi agabka loo baahan yahay: galoofyada caagga ah, qalabka ilaalinta indhaha, nadiifiyaha koloriintu ku jirto ee guryaha oo aanu ku jirin wax udgoon ama wax lagu daro, calcium hypochlorite, baaldi 5-galaan ah, burush yar, tuubada beerta, iyo koob wax lagu cabbiro. **Xidho galoofyada caagga ah iyo qalabka ilaalinta indhaha mar kasta oo aad adeegsanayso nadiifiye**.
3. Ka fogee carruurta iyo xayawaanka rabaayada ah aagga, gaar ahaan biyaha la nadiifinayo iyo kuwa koloriinta leh. Dami korontada bamka.
4. Ka qaad daboolka ceelka. Hubi oo hagaaji fiilooyin kasta soo baxsan. Waxaad dib u shidi kartaa korontada bamka, laakiin ha qoynin fiilooyink.
5. Ku qas 1 koob oo nadiifiye ah nus galaan oo biyo ah baaldi dhexdiisa. Isticmaal biyahan si aad u nadiifiso daboolka ceelka iyo dhinacyada ceelka la qoday adigoo isticmaalaya burushka wax lagu xoqo. Ka daadi biyaha meel ka fog nidaamkaaga nadiifinta iyo durdur kasta.
6. Xisaabi cadadka nadiifiyaha ee loo baahan yahay adiga oo isticmaalaya xisaabiyaha koloriinta ee [HealthVermont.gov/water/disinfection](HealthVermont.gov/water/disinfection) (link-ga oo Ingiriisi ah) ama **isticmaal ½ koob oo nadiifiye ah 10 fiit oo qoto dheer dhexroor 6-inch ah oo si fiican loo qoday** ama **isticmaal 1 koob oo nadiifiye ah 25 galaann oo kayd biyood ah oo ceelasha la qoday.** Hadafka waa in xaddiga koloriinta ku jirta biyaha gaadhaa 100 iyo 200 ppm. Sida aad u qiyaasto mugga biyaha ceelkaaga ama habka aad isticmaashid waxa laga yaabaa in ay keento xaddi yar oo kala duwan, inta u dhaxaysa 100 ilaa 200 ppm.
7. Si taxadar leh ugu shub nadiifiyaha ceelka.
8. Isticmaal tuubada beerta si aad biyaha ugu shubto ceelka si aad isugu qasto oo aad u wareejiso nadiifiyaha. Ku daadi biyaha dhinaca daboolka ceelka ama dhinacyada ceelka la qoday. Tan samee ugu yaraan 15 daqiiqo iyo ilaa 1 saac.
9. Dib u xidh ceelka oo (haddii ay habboon tahay) ku rakib cinjir (gasket) cusub haddii uu jaban yahay ama maqan yahay.
10. Tag qasabada gurigaaga gudihiisa oo inta ugu badan u jirta ceelkaaga oo ku sii daa biyaha qabaw illaa inta aad ka urinayso nadiifiyaha. Xir tuubada, ka dibna sidaas oo kale ku samee biyaha kulul. Ku celi tallaabadan dhammaan qasabadaha, qubeyska iyo baadka, musqulaha, iyo qasabadaha bannaanka. **Ka saar shaandhooyinka qasabadaha sababtoo ah waxay ku xirmi karaan qashinka soo baxaya marka aad nadiifinta wado.**
11. Fiiri tilmaamaha soo saaraha ka hor intaadan ku shubin biyaha koloriinku ku jiro weel-dhaqiyahaaga, makiinada weelka-dhaqaha ama nidaamka sifaynta biyaha qaboojiyaha.
12. **Ku dhaaf biyaha koloriinta leh tuubooyinka ugu yaraan 8 saacadood, laakiin aan ka badnayn 12 saacadood** si aad u siiso koloriinta wakhti ay jeermiska kaga disho nidaamkaaga.
13. Ugu yaraan 8 saacadood ka dib, biyo naaci nidaamka ilaa aad waayayso urta koloriinta. Ku bilow qasabadaha **dibadda**. Ku xidh tuubada beerta si ay biyaha ugu faaruqiso banaanka jayga ah ama dhul beeran. Ku daadinta xaddi badan oo biyo koloriin leh ah nidaamkaaga nadiifinta waa ay waxyeellayn kartaa. Waxaa laga yaabaa inaanad biyaha si

xawli ah uwada furin ama aad xidho qasabadda marmar si aad ugu oggolaato in ceelkaaga biyuhu uu dib ubuuxsamo oo uusan u engagin.

14. Biyo raaci tuubooyinka gurigaaga dhexdiisa adiga qasabadaha kulka iyo kuwa qabowba labada furaya ilaa aad ka waayayso urta nadiifiyaha.
15. Ka saar, nadiifi, ka dibna baddal shaandho kasta oo tubooyinkaaga ku jirtay sababtoo ah waa ay awdi karaan marka aad nadiifinta wado.
16. Dib u tijaabi biyahaaga 2 ilaa 3 maalmood ka dib marka urta koloriin ka baxdo. Ka dalbo agabka baaritaanka bakteeriyada (Kit A) Shaybaarka Waaxda Caafimaadka. Ku nadiifi qasabada adigoo ku xoqaya tiishka alkohoosha leh iyo suuf ka hor inta aanad qaadin muunada.
17. Sii wad inaad karkariso biyahaaga ama ka hel biyo meel ammaan ah ilaa baktiiriyada laga waayayo biyaha.

## Macluumaad Dheeraad ah

- Booqo HealthVermont.gov/water/coliform-bacteria (link-ga oo Ingiriisi ah)
- **Su'aalo ma qabtaa?** Ka wac Barnaamijka Biyaha Cabitaanka 802-489-7339

Somali